

Shuruudaha Tallaalka Dugsiga Missouri Tallaallada la helay 0-18 sano jir

Tallaalka ▼	Da'da ▶	Dhalashada	Bisha 1aad	Bisha 2aad	Bisha 4aad	Bisha 6aad	Bisha 9aad	Bisha 12aad	Bisha 15aad	Bisha 18aad	Bisha 19aad-23aad	Sanada da 2aad-3aad	Sanadada 4aad-6aad	Samadada 7aad-10aad	Samadada 11aad-12aad	Sanadada 13aad – 15aad	Sanadada 16aad-18aad
Cagaarshowga B (Hep B) ¹		1 st qiyaastii	2 nd qiyaastii			3 rd qiyaastii											
Gawracatada, Teetanada, xiiq-dheerta (DTaP) ²			1 st qiyaastii	2 nd qiyaastii	3 rd qiyaastii			4 th qiyaastii					5 th qiyaastii				
Fayraska Dabaysha ee aan dhaq-dhaqaaq lahayn (IPV) ³			1 st qiyaastii	2 nd dose	3 rd qiyaastii							4 th qiyaastii					
Jadeecada, Qanjo xanuunka, Jadeecada (MMR) ⁴							1 st qiyaastii					2 nd qiyaastii					
Busbuska (VAR) ⁵							1 st qiyaastii					2 nd qiyaastii					
Teetanada, gawracatada, xiiq-dheerta (Tdap) ⁶															Tdop		
Meningococcal-kada (MCV) ⁷															1 st qiyaastii		Kobciye

Kala duwanaanshaha da'da lagu taliyey ee dhammaan carruurta

- Tallaalka Cagaarshowga B (HepB). (Da'da ugu yar: dhalashada)
 - Dhallaanka aan helin qiyaasta dhalmada waa in ay helaan 3 qiyaasood oo tallaalka HepB ka kooban jadwalka 0, 1 ilaa 2 bilood, iyo 6 bilood sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah.
 - Qaado qiyaasta labaad 1 ilaa 2 bilood ka dib qiyaasta kowaad (ugu yaraan 4 toddobaad), maamul qiyaasta saddexaad ugu yaraan 8 ka dib qiyaasta labaad IYO ugu yaraan 16 toddobaad ka dib qiyaasta kowaad. Qiyaasta u dambaysa (saddexaad ama afraad) ee taxanaha tallaalka Cagaarshow B waa in la bixiyaa ugu dambayn da'da 24 toddobaad.
 - Maamulka guud ee 4 qiyaasood ee tallaalka Cagaarshowga B waa la oggol yahay marka tallaalka isku dhafan ee uu ku jiro Cagaarshowga B la bixiyo ka dib qiyaasta dhalashada.
 - Gawracatada iyo sunta teetanada iyo tallaalka xiiq-dheerta acellular (DTaP). (Da'da ugu yar: 6 toddobaad)
 - Maamul 5 qiyaasood oo taxane ah oo tallaalka DTaP ah da'da 2, 4, 6, 15 ilaa 18 bilood, iyo 4 ilaa 6 sano. Qiyaasta afraad waxaa la qaadan karaa da'da 12 bilood ka hor, waase haddii ugu yaraan 6 bilood ka soo wareegtay qiyaasta saddexaad.
 - Tallaalka dabaysha ee aan dhaq-dhaqaaq lahayn (IPV). (Da'da ugu yar: 6 toddobaad)
 - Maamul 4 qiyaas oo taxane ah oo IPV ah da'da 2, 4, 6 ilaa 18 bilood, iyo 4 ilaa 6 sano. Qiyaasta ugu dambeysa ee taxanaha waa in la qaataa maalinta afraad ama ka dib oo ugu yaraan 6 bilood kadib qiyaasta hore.
 - Tallaalka jadeecada, qanjo xanuunka, iyo jadeecada (MMR). (Da'da ugu yar: 12 bilood)
 - Maamul 2 qiyaas oo taxane ah oo tallaalka MMR ah da'da 12 ilaa 15 bilood iyo 4 ilaa 6 sano. Qiyaasta labaad waxaa la qaadan karaa ka hor da'da 4 sano, waase haddii ugu yaraan 4 toddobaad ay ka soo wareegtay qiyaasta kowaad.
 - Tallaalka Varicella (VAR). (Da'da ugu yar: 12 bilood)
 - Maamul 2 qiyaas oo taxane ah oo VAR ah da'da 12 ilaa 15 bilood iyo 4 ilaa 6 sano. Qadarka labaad waxaa la qaadan karaa ka hor da'da 4 sano, waase haddii ugu yaraan 3 bilood ay ka soo wareegtay qiyaasta kowaad. Haddii qiyaasta labaad la maamulay ugu yaraan 4 toddobaad ka dib qiyaasta hore, waxa loo aqbali karaa si sax ah.
 - Teetanada iyo gowracatada sunta ah iyo tallaalka acellular pertussis (Tdap). (Da'da ugu yar: 10 sano)
 - Maamul 1 qiyaas oo tallaalka Tdap ah dhammaan dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 12 sano.
 - Tdap waa la qaadan karaa iyada oo aan loo eegin inta u dhaxaysa tan iyo tallaalkii teetanada ee u dambeeyay iyo gawracatada sunta ku jirta.
 - Tallaalka Meningococcal conjugate
 - Maamul hal qiyaas oo ah tallaalka Menactra ama Menveo da'da 11 ilaa 12 sano, oo leh qiyaas xoojin ah da'da 16 sano.
- Fiiri jadwalka la-qabsiga ee qiyaasaha loo baahan yahay iyo inta u dhaxaysa qiyaasaha carruurta dib u dhacaysa ama bilaabma goor dambe.
- ACIP waxa ay ku talinaysaa in qiyaasaha tallaalka la qaato <4 maalmood ka hor inta aan la dhaafin inta ugu yar ama da'da in loo tiriyo inay ansax yihiin, sidaa awgeed Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Waayeeelka ee Missouri waxay ogoalan doontaa muddada afarta maalmood ah.
- Ardayda bilaabay xannaanada laga bilaabo iyo ka dib bilowga sannad dugsiyeedka 2005-2006 ilaa dhammaadka sannad dugsiyeedka 2009-2010 waa inay lahaadaan hal qiyaas oo tallaalka varicella ah ama bayaan qoran oo caddaynaya cudurka varicella (bus-bus) ee hore oo uu saxeeay waalidka ama masuulka ama dhakhtarka shatiga daawada (MD) ama dhakhtarka osteopathy (DO) ama isaga ama iyada loo xilsaaray oo waa inay ku jiraan faylka kormeeraha ama wakiilka.
- Dhammaan ardayda bilaabaysa dugsiga barbaarinta iyo ka dib bilowga sannad dugsiyeedka 2010-2011 waa inay lahaadaan laba qiyaasood oo tallaalka varicella ah ama qoraal ah oo muujinaya cudurkii hore ee varicella (busbuska) oo uu saxeeay bixiye daryeel caafimaad oo shati u haysta (tusaale, kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga ama shaqada, kalkaalisada dhakhtarka, kaaliyaha dhakhtar, dhakhtar) waana in uu fayl ku jiraan maamulaha guud ama qofka loo xilsaaray.
- Dhammaan ardayda bilaabaysa fasalka sideedaad ee bilowga iyo ka dib bilowga sanad dugsiyeedka 2010-2011 waa inay lahaadaan hal qiyaas oo ah tallaalka Tdap (tetanada, gawracatada, iyo xiiq-dheerta).
- Dhammaan ardayda bilaabaysa fasalka sideedaad ee bilowga iyo ka dib bilowga sanad dugsiyeedka 2015-2016 waa inay lahaadaan hal qiyaas oo tallaalka MCV ah.
- Dhammaan ardayda bilaabaysa fasalka 12aad ee bilowga iyo ka dib bilowga sanad dugsiyeedka 2015-2016 waa inay lahaadaan laba qiyaasood oo MCV ah, haddii aan qiyaasta kowaad la siin arday da'diisu tahay 16 jir ama ka weyn kiiskani ayaa hal qiyaas oo kaliya loo baahan doonaa.